# Oregon’s Kitchen Table – Ka qayb galinta Bulshada ee Istiraatijiyada Ilaha Biyaha ee Isku dhafan ee Oregon

## SOO KOOBIDA

Istiraatijiyada Ilaha Biyaha ee Isku dhafan ee Oregon (the Strategy) waa hab loogu talagalay hay’adaha gobolka Oregon si ay si wanaagsan ugu fahmaan oo u buuxiyaan baahiyaha biyaha ee kala duwan ee Oregon. Istiraatijiyada waxaa la cusbooneysiiyaa shantii sanaba mar. Waxaa jira 14 hay’ado goboleed oo adeegsada Istiraatijiyada si ay tallaabo uga qaadaan biyaha Oregon.

Gu’ga iyo xagaaga 2023, Waaxda Ilaha Biyaha ee Oregon (OWRD) ayaa la shaqeysay Oregon’s Kitchen Table (OKT), si ay wax uga maqasho dadka Oregon oo dhan ee ku saabsan waxa ay rabaan in ay ka dhex arkaan Istiraatijiyada xigta. Waxaanu wax ka maqalnay ku dhawaad 1900 qof oo ka kala socday Oregon.

Warbixintani waxay soo koobaysaa waxa OKT ay ku maqashay ra’yi ururin ku qoran 9 luqaddood, wada hadalada bulshada, iyo siyaabo kale oo dadku wax kula wadaageen waxa ay qabaan. Wixii ay dadku sheegeen ayaa koox ahaan la iskugu geeyay oo lagu daray fikradaha la midka ah.

## KU SAABSAN MIISKA JIKADA EE OREGON

OKT waa qayb ka mid ah Xarunta Is-afgaradka Siyaasadda Qaranka oo ku yaala Jaamacadda Gobolka Portland. OKT waxay ka shaqeysaa in dadka oo dhan la siiyo cod ah dhanka go’aan qaadashada dadweynaha, gaar ahaan dadka aan sida caadiga ah lagu darin go’aanadani. OKT waxay dadka ka caawisaa in dadku ka hadlaan arrimaha gobolka, degaanka, iyo heerka goboleedka ee saameeya dhammaanteen. OKT waxay isticmaashaa siyaabo badan iyo luqaddo badan si loo ogaado waxa ay dadku qabaan iyo waayo-aragnimada.

## WACYIGELINTA IYO KA QAYB QAADASHADA

Waxaa jiray siyaabo kala duwan oo loogu talagalay dadka in ay ku wadaagaan waxa ay qabaan. Waxaanu wada hadalada bulshada ku qabanay qaybo kala duwan ee gobolka oo ahaa Ingiriisi, Isbaanish, iyo Chuukese. Waxaa sidoo kale jiray wada hadalada bulshada ee Zoon oo ahaa Ingiriisi iyo Isbaanish. OKT iyo OWRD ayaa marti geliyay qaar ka mid ah kuwani. Xubnaha ka tirsan bulshada ayaa soo abuubalay oo marti geliyay kuwo kale. Abaabulayaasha bulshada iyo hawl-wadaagaal ayaa ka caawiyay dadka in ay buuxiyaan ra'yi ururinta oo ku qoran luqaddo kale duwan. Waxaanu sidoo kale tagnay laba ah dhacdooyinka bulshada si aanu ula hadalno dadka.

OWRD, OKT, iyo hawl-wadaagayaal badan ayaa dadka la socodsiiya wada sheekeysiga iyo ra'yi ururinta iyaga oo adeegsanaya nidaamyada warbaahinta bulshada, email, iyo farriinta koox ahaaneed. Abaabulayaasha bulshada iyo hawl-wadaagaal ayaa ka caawiyay dadka in ay ku buuxiyaan ra'yi ururinta luqaddo kale duwan. Kooxaha bulshada iyo xarumaha bulshada waxay isticmaaleen warqado macluumaad wata 'flyers', sidoo kale.

## WAXA AY OKT MAQASHAY

*Waxyaabaha dadku isku raaceen*

Dad badan ayaa waxyaabo isku mid ah ka sheegay wada hadalada iyo ra'yi ururinta. Hoosta waxaan ku qeexnay fikradahaasi ay dadku ka mideysnaayeen:

- Dad badan ayaa uga hadlay **biyaha in ay yihiin wax aynu wadaagno dhammaanteen oo ay ku xiran tahay dhammaan dhinacyada noloshu.**
  - Dadku waxay u arkaan in aanu u baahanahay wax ka badan sharciyo iyo xeerar kaliya si loo xalliyo arrimaheena dhanka biyaha.
  - Ku dhawaad qof kastaa wuu arkaa in aan qabno **baahiyaha biyaha oo ka badan biyaha la heli karo.**
  - Dad badan ayaa ka hadlay **baahida loo qabo in wax la isku dheelitiro**. Waxay dadku rabaan in ay xaqiijiyaan in aanu haysano biyo loogu talagalay **dadka iyo beeraha**. Laakiin waxay sidoo kale rabaan in ay xaqiijiyaan in ay jiraan biyaha webiyada iyo durdurada si **loo ilaaliyo kalluunka, xayawaanka, keymaha, iyo dabeecada.**
- Dadka waxay aad uga walaacsan yihiin **tayada biyaha iyo badbaadada**.
  - Dad badan ayaa ka walwalsan **biyahooda la cabo**. Sidoo kale ma aaminsana in qof kastaa helo biyo badbaado leh oo ku filan.

    - Dad badan ayaa sidoo kale ka walwalsan in **webiyada iyo durduradu** ay leeyihiin biyo nadiif ah oo ku filan oo loogu talagalay **kalluunka iyo duurjoogta kale**.
- Dad badan ayaa wadaagay walwal ay ka qabaan **haysashada biyo haddii ay dhacdo musiibo dabiici ah**. Waxay sidoo kale ka walwalsan yihiin sida musiibooyinka dabiiciga ah u saameeyaan biyaha.
    - **Abaarta** ayaa weli ah walwalka ugu sarreeya.
    - Dadku waxay sidoo kale niyada ku hayaan **dabka kaymaha iyo cimilada aadka u kulul**. Waxay ka walwalsan yihiin in ay biyo helaan xilliyadani. Waxay sidoo kale ka walwalsan yihiin in dabka kaymaha iyo cimilada kulul ay dhibaatooyinka kale ee biyaha sida abaarta ka dhigayaan kuwo ka sii daran.
- **Waxay dadku rabaan macluumaad dheeraad ah, oo cad.**
    - Waxay sidoo kale rabaan **macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan biyaha**. Laakiin dad badan ayaan garanayn halka laga helo. Waxay rabaan in macluumaadka biyuhu **noqdo mid si fudud loo fahmi karo oo ku qoran luqaddo kala duwan**.
    - Ku dhawaad wuxuu qof kastaa dadka la wadaagay in uu rabo in uu **waxyaabo dheeraad ah ka ogaado** cilmiga biyaha, isticmaalka biyaha, iyo siyaabaha loo ilaaliyo biyaha. Waxay sidoo kale rabaan in dadka kale bartaan tani, sidoo kale.
    - Dad badan ayaa raba in ay **ilaaliyaan biyaha** guryahooda gaarka ah iyo bulshooyinkooda. Waxay rabaan in ay bartaan waxyaabo dheeraad ah ee sida loo sameeyo taasi.
    - Dad badan ayaa raba in gobolku adeegsado **siyaabo kala duwan oo lagu wadaagayo Istiraatijiyada iyo macluumaadka ku saabsan biyaha**. Waxaanu maqalnay fikrado badan oo kala duwan oo ku saabsan sida hay’adaha gobolku u kaashan lahaayeen dugsiyada, maktabadaha iyo madxafyada.

- **Dad badan ayaa daneynaya abaalmarino dhiirigelineed ‘incentives’ oo kala duwan si loo ilaaliyo biyaha oo biyaha loogu isticmaalo si wanaagsan.**
    - Dad badan ayaa raba in ay ka qayb qaataan **kaydinta biyaha**. Waxay rabaan in ay awoodaan in ay biyaha si sahlan ugu kaydiyaan guryahooda iyo bulshooyinkooda.
    - Waxay sidoo kale rabaan in ay helaan qalab ka caawiya in biyaha laga dhigo kuwo badbaado leh. Dad badan ayaa daneynaya in ay helaan filtarada **’filters’**.
    - Dad badan ayaa sidoo kale raba in ay arkaan **qalab ka caawiya in biyaha loo isticmaalo si wanaagsan**. Waxay u rabaan guryahooda, ganacsiyadooda, warshadahooda, iyo beerahooda.
- **Waxay dadku rabaan in ay arkaan isbeddelo la xiriira sida Oregon u gaarto go’aanada iyo biyaha.**
    - Dad badan ayaa u arka in lahaanshaha **hay’adaha gobolka oo badan oo kala duwan oo ku lug leh biyuhu ay tahay mid jahwareer leh**. Waxay rabaan in ay arkaan hay’adahaasi gobolka oo si dheeraad ah u wada shaqeeya.
    - Waxay dadku rabaan in ay arkaan **ficil**. Waxay rabaan go’aanada iyo ficilku in ay u dhacaan si degdeg ah.
    - Dad badan ayaa raba in gobolku **xaqiijiyo in xubnaha ka tirsan bulshada loogu daro** siyaabo kala duwan. Waxay rabaan in go’aan gaarayaashu dejiyaan xiriiro lala leeyahay xubnaha ka tirsan bulshada oo ah meelo kala duwan.

*Waxyaabaha dadku isku khilaafeen*

Dad badan ayaa ka hadlay fikrado aysan dadka kale la wadaagin iyaga. Hoosta waxaan ku qeexnay fikradahaasi:

- **Dadku waxay isku khilaafaan xuquuqda biyaha.**
    - Dadka qaarkood ayaa u arka in aanu u baahanahay in aanu ka fikirno **in la beddelo sida xuquuqda biyuhu** u shaqeyso hadda iyo mustaqbalka. Dad

kale ayaa u arka in **xuquuqda biyaha ee hadda jirtaa ay tahay in la ixtiraamo**.
    - Dadka qaarkood ayaa taageeraya fikradaha ah sida loo ilaaliyo xuquuqda biyaha ee hadda jirta iyo in la xaqiijiyo in biyahaasi qaarkood loo isticmaali karo siyaabo kale.
- Dadku waxay isku khilaafaan **sida loo gaaro go'aanada biyaheena.**
    - Waxa muhiimada aadka ah u leh dadka ee ku saabsan biyaha ayaa run ahaantii kala duwanaan kara. Qaar ka mid ah, baahiyaha biyaha ee dadka ayaa u horreeya. Dadka kale, baahiyaha biyaha ee dabiiciga ah ayaa ah kuwo muhiimad aad ah leh hadda iyo mustaqbalka.
    - Dadka waxay sidoo kale isku khilaafaan **cidda ay tahay in ay doorato sida la iskugu dheelitirayo baahiyaha kala duwan oo dhan**. Dadka qaarkood ayaa raba in gobolku uu go'aan ka gaaro. Dad kale ayaa raba in ay arkaan dowladda hoose iyo shakhsiyaadku in ay go'aamiyaan. Iyada oo dadka qaarkoodna rabaan in ay arkaan gobolka iyo dowladda hoose labadooduba in ay go'aamiyaan.

## KA QAYB QAADASHADA MUSTAQBALKA

*La soco Istiraatijiyada*

Gobolka ayaa sii wadi doona shaqada cusbooneysiinta Istiraatijiyada ee dayrtani. Dadku waxay rabaan in ay arkaan sida taladooda loo isticmaalay. Waxaanu ku talinaynaa in OWRD iyo hay'adaha kale ee gobolku si ballaaran u wadaagaan cusbooneysiinta qoraalka qabyada ah ee la xiriira Istiraatijiyada. Waxaan sidoo kale ku talinaynaa in ay ku sharraxaan luqad cad sida ugu suurtagalsan oo ah sababta ay u go'aansadeen in ay sameeyaan isbeddeladaasi. Dad badan ayaa weli wax ka ogaanaya Istiraatijiyada iyo qaybaheeda. In wax la sii dabagalo waxay gacan ka geysan doonaa sii wadista dhisida aaminaad lala leeyahay bulshooyinka.

*Ku martiqaad dadka si ay u wadaagaan waxa ay u arkaan qaybaha Istiraatijiyada*

Ka dib marka Oregon dhammeystirto nooca xiga ee Istiraatijiyada, 14 hay'ado goboleed ayaa mid kastaa gaari doontaa go'aano ku saabsan tallaabooyinka iyo

mashaariicda ku jira Istiraatijiyada. Kani wuxuu noqon doonaa waqti kale oo hay'adaha gobolku ay marti qaadi karaan xubnaha ka tirsan bulshada in ay qayb ka noqdaan istiraatijiyada biyaha ee Oregon. Tusaale ahaan, dad badan ayaa walwal ka qaba tayada biyaha. Waxay rabaan in ay wax ka ogaadaan oo wax ka qabtaan wasakhda ama wasakhowga biyaha. Waaxda Tayada Deegaanka (DEQ) ee Oregon ayaa go'aan ka qaadan doonto tayada biyaha. DEQ waxay ku martiqaadi kartaa dadka si u wadaagaan waxa ay u arkaan siyaabo lagu wanaajin karo tayada biyaha. Dadka ayaa sidoo kale daneynayay go'aanada ku saabsan biyaha iyo horumarinta bulshooyinkooda. Waaxda Ilaalinta Dhulka ee Oregon ayaa dadka ku martiqaadi karta in ay diiradda saaraan arrintaasi ee hawlaha ka qayb qaadashada mustaqbalka.

## GUNAANADKA

Dadka reer Oregon waxay u arkaan biyaha siyaabo kala duwan oo badan:

- Shakhsi ahaan iyo qoys ahaan;
- Koox yar ahaan;
- Sida bulshooyin wax wada qorsheeya, wada nool, oo wada shaqeeya;
- Sida qayb ka mid ah dunida dabiiciga ah;
- Sida ururo rasmi ah oo waaweyn oo leh awood; iyo
- Sida bulshooyinka ka shaqeeya meelo, dad, iyo warshado.

Waxa aan maqalnay inta badan waa in xubnaha ka tirsan bulshada ay qaybtooda u qabtaan si shakhsi ahaaneed iyo si wadajir ah.

Hay'adaha gobolku waxay adeegsan karaan fikradani si ay uga fikiraan qiyamka dadka ee ku xeeran biyaha. Waxay sidoo kale u adeegsan karaan in ay diiradda saaraan fikrado gaar ah oo loogu talagalay cusbooneysiinta Istiraatijiyada. Waxayna mid kasta u adeegsan karaa in ay wada hadal qoto dheer ka yeeshaan walwalka dhanka biyaha.